YAXYE YAASIIN XASAN
(ANSAARI)

GABADHII LABADA REER HESHIISISAY





XUQUUQDA DAABACADDA ©YAXYE YAASIIN XASAN 2016

Buug yarahan waxaan ugu talagalay in qaab electronic ah u baahiyo sidaas darteed Qof kasta oo u baahdo inuu daabacdo buug yarahan wuu daabacan kara isaga oo ilaalinaya xuquuqda lahaanshaha buugga.

Contacts

ADDRESS: KEBELE:18, HN:0223, JIGJIGA, ETHIOPIA.

MOBILE: 00251-915-74-85-34 / 09-38891208

E-MAIL: YAXYE24@GMAIL.COM

Facebook: https://www.facebook.com/ qoraa yaxye yaasiin

JIGJIGA, DDSI, ETHIOPIA.

QISO DHAB AH

HIBAYN

HOOYO XAAWO FARAX CADE

TAFATIRAYAASHA

YONIS XASAN KULMIYE (TAWLANE)

IQRA CUMAR SULUB

XASAN NUUR CALI

SEPTEMPER

2016

ISBN: 23-88117-32-9

ALLA MAHADA LEH.

I.

Sheekadan waxay dhacday bay ahayd taariikhihii hore qabiilooyinka soomaaliyeed ee yar yaraayeen qabiil walba meel buu dagi jiray isagoo isku dhan oo waxba ka maqnayn, qabiilkasta marka nin bay madax ka dhigan jireen ninkaa madaxda uun ayay ku gowracnaan jireen.

iyadoo lagu tilmaamo dhinaca bari siiba aagaa laascaanood iyo garowe u dhexeeyo baa lagu tilmaama odayaasha aan ka soo gaadhnay ku tilmaami jireen laba reer baa halkaa daris ku ahaa labada reer nin waliba boqor ayuu lahaa oo hogaamiye ah oo ay ku gowracnayeen oo ay wax ka maqlaan arrinkiisana ku socdaan, ka bacdi wiil iyo gabadh baa iska jacelaa jacelkuna bariguu asturnaa bay ahayd ee uu labisnaa oo uu huga gashnaa isla markaana aan dhaaxba la ogaan jirin, labadaa qof jaceyl fiican baa dhaxmaray oo qaali ah, jaceylkooguna waxaa gundhig u ahaa kalsooni iyo ixtiraam waxay axdi ku wada galeen inay maalin jacelka ka miro dhaliyaan oo ay isku guursadaan, noloshana wada qaybsadan duruufkasta iyo carqalad kasta oo ka hortimaado ina aynan wacadka eynan ilaawin ama aysan ka bixin dhib iyo dheefna wadagaan.

balse nasiib darro inanta waxaa ba dhalay boqorka beesha ay ka dhalatay xukumo isla markaana waxaa dhacday labadii beelood iyagoon inankan iyo inantan jacelkooga cidi ka war qabin baa waxa dhexmaray dagaal mina laahi ah birtaa la iska aslay, colaadii baa lala kala fogaaday colaadi

khayr ma leh, waa lakala fogaaday in badan baa lakala durkay reerba meel maqal goye aan iskaga dhaweyn buu dagay.

Maadaama uu dagaal xun dhacay qof waliba dhinac buu u shakiyay inantii iyadu quus bay is galisay balse inankii baa jacelka hayn waayay ka bacdi galab galbaha ka mid ah wuxuu u yeedhay nin cid isku xigaan beeshii buu dhinac uga saaray, maxaad halkan ii keentay buu yidhi , waxaan doonayaa inaan wax kuu sheego, ii sheeg buu yidhi, magaranaysaa beeshii halkan colaadu ina dhex martay een isku dhacnay, haa buu yidhi, Beesha gabadha ayaan ka jacelaa waxwalba hadday dhacaan dayn mayo sidaa darteed waxaan kuugu yeedhay inaad iraacdo.

Wuxuu yidhi ma talo mise raacid aan ku raaco horta raacid aan ku raaco iska liq oo iska ilaw balse talaan ku siinayaa reerka aad ogayd wixii ina dhexmaray gabadha ha u doonanee naftaadana ha haliginee iska ilaaw gabadh waayimeysidee go’aankaas ayuu siiyay ugu dambeentii waa iska soo tageen.

Saddex bari hadduu joogay maalintii dambe miriq buu yidhi waa uu dhuuntay waana iska tagay wuxuu soo socdaba dalku waa dal yaab badan wixii aad cuntaa waa qadhaab waxaad aragtaana waa xawayaan si daasuu waagii hore dalku ahaa hada geed walba boqol qof hoos taagan tahay Isla markaana wuxuu soo socdaba oo juuc ku soo jiraba deegaanku reerka ku maqlay buu ku soo baxay wuu soo dhuumaalaystay goor galab

ah beeshii bildhaan keedi wuu arkay balse wuu isa soo qariyay isagoo laago soo xulaya oo marba qoor diinlaynaya ayuu wuxuu arkay ‘hee’ inan halkan agtiisa adhi ka caraabinaysa laag buu soo xulay meel yar gaaban buu ka eegay mise waa inanti laftigeedi ina boqor ahayd oo adhi maydhacaysa meel gaaban buu kaga soo booday inantii , inantii aad bay iskugu naxday ilaa iyo xad Waxay tiri waryaa heen salan ka bacdi maxaa kugu dhacay, Adaa igu dhacay buu yidhi, Soo ma ogid beeshayada haddaad tagtid in lagu gowracayo lagu biireenayo oo lagu badbadinayn,Waliba in la ikarsanayo baan ogahay oo maraqayga la cabayo.

Balse hadda anigu beesha umaan socon ee adaan ku doonayay axdigii inaga dhexeeyiyo balantii inoo tiil ayaan dabataagnaa, Laba mid yeel hadba adiga kii kula qurux bata Waa Qodobka kowbaad halkaa inaga bixi oo ina mari waa adiga qofkaan doonayee anigoo axdigaan lahayn iyo balantii dabajooga Hayeeline ina mari adhiga aan kula hooyo ha la idilee wax ka dhexeeyaba haba doon doonin ba arrini halkaasay joogtaa.

Waa xujo adag xaqiiqadii waana gabadh soomaaliyeed oo gabdhihii hore ah Oo waliba ku ah gabadh qaali ah.

Copyright Samewade books

II.

Waxay tiri arintu haday halkaa joogto waan ku raaciyee hee; Xiliguna xoogaa ayuu dayr iska yar yahay, beeshii waad aragtaa aqaladaa ugu sokeeyo waa aqaladayadii goonida u soo go’an adhigan ayaan hooy nayaa oo baylahda ka hooynayaa halkan ku habeenso oo marka shaacu kuu madoobado geedka weyn maad aragtaa ee cidlada ka taagan hoostiisa kaalay, Marka la kala seexdo halkaasan kuugu imaanayaa oo aan kaa raacayaye. Sidii baa layeelay adhigii bay gaysay xoolihii lakala maal oo lakala hooysay isna geedkii guntiisa yimid oo haddii xoolihii lakala hooyay oo hurdadii loo soo diyaar garoobayo Baa ilaahay cirka maraqa ka furay roob mahiigaana baa ku fadhiistay.

Gabadhu waa buulay, buulay waxaa la yidhaahda inanta gashaantida ah ee soomaaliyeed aqal gooni ah bay iska lahayd oo cidi la wadaagin hasa ahaate bacda maa uu roob culusi bilaawday waxaa aqalkii kala soo jirsaday walaalkeed ey dhalasho ku xigtay oo kor ugu waynaa oo doob ah iyo ina adeerkeed, adeerkeed abaheed la dhashay dhalay ay walaalkeedan ka wayn isku filyihiin oo geela dhexjoogay baa inantii roobki kala soo jirsaday.

Inankii wax buu saadaliyay wax buu odorasay wuxuu is yidhi roobkan war mid qaadaya ma ahee ilaa uu waagu ka baryo kolay siday u muuqato haddaba nin iska dhigoo dhibkasta qaboo tusmadii reerka waad garanaysaye, tusmada waxaa la yidhaahda sida aqalada u dagaan aqal

Copyright Samewade books

walba jahaduu u jeedo waa wax iska soomaalidu dhaqan u leedahayoo qaali ah oo xitaa cidiba miisami Karin ama koobi Karin labaatan iyo todoba aqal oo meel wad dagan meel ka wada dhisan adigoo sadddex sanadood reerka ka maqnaa habeenimo guuro haddaad ku timaadid hee aqalka hooyadaa cidna waydiin maysidee waad garanaysaa tusmadii uu ahaa hadba reerku meesha uu u jeedo labada dhinac.

Tusmadii reerka waad garanaysa uun buu is yidhi roobka gabadhii ku gaadoo waatii cidla buulayda ahaydee roobka ku soo kaxayso dhib kasta qabee isagoo qiyaastii soo qabsaday wuxuu soo gurguurtaba wuxuu soo dhuumalaystaba soo socdaba soo jiitamaba wuu yimiday aqaladii roobkuna xoog buu u da'ayay, hilaacuna waxbuu tusayaa, onkodku cabsi iyo argagax ayuu naftiisa ku beerayay hasa ahaatee wuu helay tusmadii reerka aqalkii gabadha ayuu raarta dambe oo dibada aha soo fadhiistay dhagtuu dhigay mise laba nin baa ka sheekaynaya, iyana waa taa halkaa ka sheekaynayso umana gali karo.

Ushuu sitay buu yacayga aqalka xaga dambe ka soo dusiyay inantu meeshi ay ka sheekaynaysay buu ku soo aadiyay halkaa bowdada ah bay inantii ka fuushay usha madaxeegii kumay nixine way qabatay isla markaana way garatay iyadoo ushii madaxa haysata isna uu xaga dambe haysto bay inamadii walaalaheed ahaa walaalkeed iyo ina adeerkeed ruma waxay ku tiri War marka roobku da'ayo haddii aan la sheekaysan waa la qadh qadhaayo waa la dhaxamoodaa ama waa lagu hurdoodaye hee ama inoo sheekeya ama annaa sheekooyin yaab leh hayee iga

Copyright Samewade books

dhagaysta, isna wuu dhagaysanayaa, soo daa baa la yidhi haddaad sheeko fiican haysid Waxay tiri bari baa laba reer daris ahayeen wiil iyo gabadh baa labada reer iska jacelaa labadii reer baa dagal sokeeye dhexmaray oo anaga iyo reer hebal ma dagaal ayaa ina dhexmaray? Umulo doox baa ka dhacay bay tiri, labadii reer dagaalkii bay kala firxadeen oo annaga iyo reer hebal maynu kala fog nahay soo annaga maqalnay meesha ay dagan yihiin, way kala durkeeno way kala firxadeeno kala fogaadeeno colaadii darteed.

Inankii ayaa jacelkii hayn kari waayay dabadeedna wuu soo tagay wuxuu soo raadiyay inantii wuxuu soo dhuumalaystaba gabadhii oo goor gabal gaab ah meel adhi ka caraabinaysa Illaahay la kulansiiyay, gabadhii ilaa iyo xad bay ka naxday waxay ku tiri war maxaa kugu dhacay, Adigaa igu dhacay buu yidhi, Hahee maxaa ku helay bay ku tiri, Adigaa I helay buu ku yiri, Soo ma ogid haddaad reerka tagtid in lagu gowracayo Waan ogahay buu yidhi laakiin anigu adiga ayaan ku doonayey ee laba mid yeel halkaa inaga bixi adaan ku rabaye axdigeeni ayaan dabasocday hayeelinay adhiga han kula hooyo ha la idilee wax ka dhexeeyana haba raadinin inantii yaab buu alle u keenay xujayna ku noqotay.

Waxay tiri labadaa hadday joogto waan ku raacayaye waxaad yeeshaa hee geedka imoow marka shaacu madoobaadan kuu imaaniyaa oo ku raacayaa inanka diif xun baa ka muuqato meel xun buu soo maroo daal, haraad, baahi badan iyo jeenaf baa ka muuqato.

Copyright Samewade books

Kabacdi markay inantii adhigii xerada gaysay een muxuu ahaa isaguna show geedkii tagay ayaa illaahay raxmadii cirka ku gaaxsaneed maraqa ka furay oo caawo ma rooba ina hayo? Ma hiigaan baa ku fadhiistay bay tiri, gabadhu waa buulay alla sheekadu halkaa way iskaga egtahay gabadhu hadday buulay ahayd sidaydoo kale baa waxaa la soo jirsaday inaa adeerkeed ruma iyo walaalkeed kor uga weyn dee sidii naas oo kale allaylehe halkaa sheekadu way iskaga egtahay.

Inankii intuu qalbiqaatamay is yiri gabadha roobka ku soo qaado tusmadii reerka waad garanaysaaye reerkii buu soo aaday aqalkii duladkiisa ayuu soo fadhiistay wuxuu sameeyay hee ushuu sitay buu yacayga ka soo dusiyay inantii bay bawdada ka fuushay inantii kumay nixine way qabatay markaa aqalka hadduu soo galena ka soo qaad ba ina hebal iyo ina hebal iyo hebal iyo ina hebal magaca afaarad intay ka soo dhigtay inanka dibada taagan laftigiisa iyo hebal mid ka mid ah hadduu caawo iska soo gali lahaa aqalka bal ka warama ?

Nagadaa! waxaas hadalka dacartiisa kuwaas nasiib aan ku aragnaba ma lihin waa sheeko macaane noo wad baa la yiri oo yaab lehee, Haa isageey dhagta ugu ridaysaa in halkan sharafi u oolin ninka soo daqdaq leh oo aqalada iska imaanayo dabadeedna waxay tiri inanku saas oo kale buu ahaa markii inantii inanki bay lahadashay iyadoo ushii wali madaxa haysato, markaa yey lahadlaysaa isaga laftigiisa hadalaysaa weeye,

Copyright Samewade books

waxay inantii ku tiri inankii dibada taagnaa

War inanyahow wad ku wad,

Mise hawo ku waday,

Mise hunguri ku wad,

Inanyahow hadday wad ku wado aqalka roobka ka soo gal ha lagu dilee bay tiri , hunguri hadduu ku wadana adhiga xeradiisa miscirirta bariga xigta dhiisha caanaha ee ku jirta awalba adaan kuu galiyee kala bax oo cab , hawo hadday ku wadana kuma illaawine orad geedkii tag waan ku raacayaaye, marka roobku kawawaaran kuu imaniyaaye haddu alle idmo.

Copyright Samewade books

III.

Dabdeedna ushiisi buu labaxay wuxuu aaday geedkii intuu caanihii cabay dhiishiina u suray ardaaga ayuu geedkii tagay roobki markuu yar kawawaaray ayay soo baxday wey u tagtay dabadeedna waxay aaday geedkii waa la israacay sidiiba lagu tagay haddii waagu baryay waxaa la yiri war heedhe inantii bal soo kiciya adhiga dhiriqda ha ka hagaajisee maqasha iyo waxaraha ha ku xidhidho xadhiga maxa saaka ku dhacay ee u toosi wayday ma xalay soo jeeday, gurigii baa la baadhay mise ma joogto oo kaalay xagey bay aaday markaasa haddan la is waydiiyay xalay xoolaha ma waxbaa ka maqnaa? maya baa la yidhi oo haddaa kalay markuu roobku qaaday wata halkan martay xagakana reerba ma jiro maxay ka doontay war bal raadkeeda gura; raadkii baa la guray mise alla waata geedka ka raacday ninka, sheekadii xalay qalam baa ku soo dhacday Iyadoo la cararayaa baa boqorkii loo yimid waxa la yidhi xalay bay musasal nagu dul akhridayoo hee dee nin reer hebal ah baa gabadhii qaaday boqorkii baa loo sheegay, oo anagay musasalka xalayto nagu dul aliftay musasalkuna run buu ahaa oo halkaas bay nin ka raacday .

Copyright Samewade books

Boqorkii cadho iyo xanaaq darteed ayuu wajigii casaaday, warankuu ciida galiyay wuxuuna yidhi ma nin reer hebal ah baa gabadhaydii ka xaystay iisoo qabta fardaha labadii wiil iyo isagiibaa saddex faras soo fulay warmihii iyo seefahaa la soo qaatay ma lug baa faras meel ka gaadhaysa Barqaadii iyagoo halkan sii cawscawsanaya baa lagu soo baxay waa la arkay saddexdii farasna waa lagartay Waxay inantii inanka ku tiri war bal talo keen waad aragtaa waa la ina hayaaye talo ma haysaa Waan hayaa buu yidhi, soo daa bay tiri wuxuu yiri waxaan ku iri ilaahay samir iyo iimaan ha iga kaa siiyo dhiniciisana ha kaa gargaaro waayo sababta oo ah anigu waa qodobka kobaad ma baxsan karo faras baa I haya, waa laba ma dagaalami karoo oo waa la iga badan yahay oo waaba la idilayaa, waa saddex inaan dagaalamaba xaqba ma aha mana la ideynayo oo waaban ogahay sidaas darteed ilaahay samir iyo iimaan ha iga kaa siiyo Waxay tiri talo kale ma haysaa , ma hayo buu yidhi.

Waxay tiri lagu dili maayee talo ma hayside halkan fariiso kadaloobso wuu kadaloobsaday, gabdhuhu maro saddex qayd la yidhaahdo bay xidhan jireen oo kaliya oo isku taal, saddex qaydkiba way iska wareejisay duluciyo garayskiba intay furtay bay maradina iska wareejisay dushay kaga xidhay dabadeedna iyadoo qaawan gashaanti ah ayuun baa sidaas isku dul taagtay ninkiina maray ku xidhay oo dusha kaga xidhay waa barigii soomaalidu kala xishoon jirtay malaha hada anay isku kay qaaqawinaysaa bilaa edabada xuni baa la oran lahaa waa lagu bilaabi lahaa dee markii wax yar loo soo jiro oo la arkay inantii oo

qaawan, la eegi kari waa indhihii baa la siin kari waayay inantii oo qaawan nin maradeedii dusha kaga xidhay dul taagan ka bacdina maxaa dhacay hanjabaad iyo caga juglayn iyo waxbaa la iskugu daray iyadoo la sii jeedo in doorana loo jiro, ilqoorkaa laga daymooda mise hasheegin wataa khalaasatu ka dulyeedhaysee iyana iska dultaagan hadal iyo hugun midna aanan lahayn illaahay yaab buu nimankii iskugu keenay goor qoraxdii soo kululaatay baa abbaheed isagoo sii jeedo waana boqorkii beesha xelo furka u siiyay wuxuu yidhi saddex dalqadood baa hooyadaa igaga furantahay oo laga bilaabo qayrkayna xalaal ugu tahay ee anigana xaran igaga tahay labadaa nin oo mudakarkaa qaangaadhka ahina ay markhaati ka yihiin nin kastuu yahay toona inaan lagaa dilaynine waan kuu dhisayaaye maradaada qaado, ku celi bay tiri aabbo, wuu ku celiyay maradeedi bay xidhatay soo jeesta bay tiri intay u qaylisay waa la soo jeestay waa loo yimid mise ‘kaw’ waa bahal dilihii beeshaba dhameeyayoo ragaba ugu cadcadaa uguna halyaysanaa ugu dilaasanaa uguna khatarsanaa uguna geesisanaa beesha ba .

Hebal bal waran, ladnaan

Boqorki wuxuu yidhi soo fuul faraskayga wuu soo faneeyay inankii uu dhalay buu ku yidhi walaasha faraska soo fanee wuu soo faneeyay inanka adeerka u ahaa buu ku yiri horay u carar faraska ula baxso afkaagu saa ha u xidhnaado aqalkaygi intaad gogoshid wuxuu cuna ninka igu diyaari sidii buu yeelay aqalkii baa la soo galiyay.

Copyright Samewade books

Beeshii baa buun wax la yidhaahdo loo afuufay ama caroog banaan baa la iskugu geeyay marka banaan la iskugu geeyay baa boqorkii u yimid inankii uu dhalay buu ku yiri isoo ka xee inanka oo igu keen shirka meesh markii la iskugu yimid ayuu yidhi sacadaa waxaan iskugu kiin yeeray, waana boqorkii beesha oo waxna laga qori jiray waxaan sacadaa iskugu kiin yeeray hee inankaa inankayga la soo socda maad garanaysaan, inankaa inankayga la soo socda waa kuma? Waxa la yidhi garan mayno cabaarbaa la fiiriyay , bal aad u eega buu yidhi waa la eegay alla waa la gartay kalay war miyuunsan hebal ahayn ina hebal ahayn wallaahi waa isagii , haddee ma iska yimid may kayntay iyadoo taxabaysa, kii malakumood ahaa miyaa keenay .

Waa la kacoo nin waliba is yiri yaan gacanta lagaaga horayn dee markaasu boqorki yidhi waad garateen baan u malaynayaa inuu ina hebal yahay beeshoodana wixii inaga dhexeeyay waad ka war qabtaan oo waad ogtihiin balse waxbaa ka sokeeya ninka hunguri ka galow beesheena ahow aniga boqorka ah iyo inamadeeyda soo laa markaa ka bacdi isaga u tag , inantaayda hebla ayaan caawo ku meherinayaa una dhisayaa nin walibow hungurigaaga dib u dhigo iskana ilaaw wixii dhacay dee boqorkiiba amar bixiyee maxaa lagu hadli waa la keenay iyadoo markaa wajiga la iskugu imanayo aad dareemi kartaan shucuurtu siday tahay, indhaha aan la isa siin karayn, raggii is xaaqay ah, asalaamu calaykum, wacaleeykuma wasalaam, war hebal bal waran , war side tahay ma fiican tahay, haa mar dhow baa boqorkii inankii waayay

marba mid illeeyn dad dhalad oo isku xidhan bay ahayeene marba mid uun baa ka xeeya oo ka waran islaantii habaryar aheed waa tii barigii odaygii ka dhintee caruurti ka waran maxaa ka nool side xaalkoogu yahay, tii yareed ee ina abtida ahayn bal kawaran iyada xalkeedu ninkii waa kii barigii dhawacmee muu u bogsaday, sheekoyin caynkaas ah ayaa la iska galay , sidiibaa habeenkii gabadha loogu meheriyay maalintii loogu dhisay labadii beelood sidiibay yarad ku kala qaateen, ku xidiideen, gacal ku noqdeen isla markaana colaadii kaga suurtay.

‘Jacelka dhabta ah waa kii guulaysto marka duruf iyo carqalado badan ka horyimaadan’

_yaxye yaasiin xasan

Copyright Samewade books



yaxye yaasiin xasan waa dhiirigaliye nololeed, tababare nololeed , qoraa wax ka qoro arrimaha bulshada gaar ahaan horumarinta aadmaha. Sheeko faneedyada, taariikhda iyo suugaanta af soomaaliga , waa qoraha buugga baadigoobka guusha buuggaas oo aha buugga ugu samaynta badnaa wakhtiguu soo baxay,

qoruhu waxaa kaloo ka mid ah teamkii qoray buugga googa abwaankow, diwaan sugaaneedka abwaan siiciid maxamed jamac (abwaan siciid biid). wuxuu ururiya ama kayd ahaan u hayaa buuggag badan oo afsoomaali ku qoran, qoruhu waa arday ku xeraysan jamacad jijiga waxdeeda xanaanada xoolaha sanadkii afaraad, wuxuu kamid yahay golaha fullinta naadiga horumarinta dhaqanka iyo afsoomaaliga ee jaamacada jijiga waana gudoomiyaah sugaanta iyo qoraal. waana aasaasaha ahna gudoomiyaha naadiga kobcinta akhriska, qoraalka,iyo dhaqanka ee curis.

_YAXYE YAASIIN XASAN

Buug yarahan waa buug ka hadlayo xikmadii, dhaqankii hablihii soomaaliyeed hore ku xalin jireen dhibaatooyinka iyo colaadaha la soo wajaha bulshadooda iyagoo isticmaalayo xikmadooda caqligooga iyo kartidooda markaa qofkasta oo akhrista buuggan wuxuu kala baxayaa xikmad qaali ah oo nolosha ku saabsan ……

_Cabdiraxmaan axmed cabdulaahi (medical student, jigjiga university)

Qoraa yaxye yaasiin xasan waa nin jacel inuu aqoontiisa iyo xikmadihiisa bulshada u gudbiyo si ay uga faa'iidaystaan, waa qoraa qaali ah xaqiiqadii aad iyo aad ugu dulqaad badan , aad iyo aad ugu adkaysi badan inuu bulshada dhaxal waara uga tago oo u reebo , waa nin umadiisa u heegan ah si ay ugu soo dhacado tubta nolosha , ma aha nin qabyaaladeed illaahay wuu ka koriyay waxaana u daliil ah buuggaagta uu qoray, aad ugu fiirso buugtiisa wuxuu yahay aadaaba ka dhex heli doonee…..

_Abwaan siciid maxamed jaamac (abwaanadii hore kooxdii janaraal daa'uud iyo kooxdii waabari soomaaliya, macalin mudho dheer af soomaaliga jaamacado badan ka soo dhigay.)



Copyright Samewade books